# Golaha Wakiiladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

***Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 12aad fadhigii 2aad***

***Wakhtiga uu Furma:-*** 09:47 AM
***Taariikhda: - Axad 27 July 2025***

**Gudoonka: -** Mudane, Siciid Mire Giire Faarax

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

**Ajandaha Fadhiga: -** Doodda Ajandaha Kal-fadhiga 12aad

**Md. C/laahi Muuse Cabdi: -** Shir-gudoonka, Xildhibaanbada, Shaqaalaha iyo Saxaafada ASC, Salaan ka bacdi, runtii kal-fadhi kasta waxaynu qaadanaya ajande 20 ilaa 30 qodob ah waxa ka fulaanaa way yaraadaan.

Waxaan soo jeedin lahaa Ajandaha ina horyaala inaynu koobno oo wixii laga gaadhsiin karo marka laga gaadhsiiyo, laakiin inaynu liis dheer qorno waxaan qabaa inay wakhti lumis uun ay tahay, waxyaabaha Ajndaha ka maqan ee in lagu soo daro aan qabo waxa ka mid ah:-

- **Abaaraha,** abaaruhu iyagoo ku jira xaalada guud, hadana waxay u baahan tahay inaynu gaar abaarahaas u xusno, isla markaana aynu ka hawlgalno oo ay noqoto waxyaabaha ugu horeeya ee inaynu ka qabano ay tahay.
- **Arrinka wada-hadalada Soomaaliya iyo Somaliland** in isagana lagu daro ajandaha ayaan soo jeedinayaa.

**Md. Axmad Dayib Aadam (Ku-cadeeye):-** waxaan la qabaa ajandahan fara-badnaantiisa mudanayaasha hore ee carabka ku dhuftay. Anigu ajandaha waxba ku soo kordhin mayo laakiin Waxaan soo jeedinayaa:-

- In Xeerarka Ajandaha inoogu jira 4 ama 5 Xeer aynu qaadano, marka 5taas xeer aynu ka gaadhsiino.

**Md. Maxamed Xuseen Jaamac (Raambo):-** Waxaan soo jeedinayaa

- In **Arrinta Abaaraha** gaar looga saaro Xaalada guud ee dalka.

- In **Xeerka Saxaafada** aynu xaga hore soo marino oo ka dhigno qodobka 1aad ama 2aad.
- In **xaalada Amniga** gaar looga saaro xaalada guud oo aynu Wasiirka Arrimaha Gudaha, Taliyaha Booliiska iyo hay'addaha Amniga aynu Golaha uga yeedhno.
- In **Arrinta Laascaanood** Iyana aynu ka saarno Xaalada Guud, madaama Meesha safiiro shisheeye marayaan aynu u yeedhno Wasaarada Arrimaha Dibada oo aynu wax ka waydiinaa.

**Md. Axmed Maxamed Hure (Barkhad):-** marka hore Shir-gudoonka, Xildhibaanbada, Shaqaalaha iyo Saxaafada ASC, Salaan ka bacdi, Gudoomiye sida Xildhibaanada hore sheegeen in Ajandaha kal-fadhigan badan yahay, waynuna ognahay inaynaan ka wada-gaadhsiin karayn, marka waxaan la qabaa Mudanayaashii hore in la soo koobo, sida darteed, waxaan soo jeedinayaa:-

- **In Xeerarka wixii Golewaynaha yaal** inaynu ka dhigno mudnaanta kowaad.
- **In Xeerarka Gudiyadu gacanta ku yahaan** ee akhriskii 1aad ku jirana waxaan qabaa inaynu ka saarno.
- **Xeerka Ciqaabta Guud** oo aad u muhiima waxaan qabaa xeerkaasna inaynu ku soo darno.
- **Arrinta Abaaraha** waxaan ku raacsanahay mudanayaasha soo jeediayay in gaar looga saaro Xaalada guud ee dalka.

**Md. C/laahi Yuusuf Axmad:-** Shir-gudoonka, Xildhibaanbada, Xoghayaha Guud, Shaqaalaha iyo Saxaafada ASC, waxaan soo jeedinayaa:-

- In **Arrinta Abaaraha** waxaan la qabaa Xildhibaanada soo jeediyay in gaar looga saaro Xaalada guud ee dalka oo maalin gaar ah laga hadlo.
- In **5ta Xeer ee Golewaynaha horyaal** sida ajandaha ku qoran aynu bil gudeheed ku dhamayno oo u soo horaysiino.
- Xeerarkka kale hadii Goluhu si fiican u shaqeeyo waxaan aaminsahay inaynu 10 xeer dhamayno karno, marka iyaga aynu ugu soo horaysiino **Xeerka Saxaafada iyo Xeerka 2% Gobolada Barri iyo kabka dawladaha hoose** oo muddo ina horyaalay.

**Md. Xasan Cumar Xasan (Ogaal):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanbada, Shaqaalaha iyo Saxaafada ASC, Salaan ka bacdi, Mudane Gudoomiye, 7 qodob ee 1 ilaa 7aad marka laga yimaado, Xeerarka Ajandahan ku jiraa waa 14 Xeer, afar iyo tobankaas xeer waxa dood u baahan 5 xeer, codaynta hal xeer baa u baahan, akhriskuna waa 8 xeer, marka loo eego wakhtiga aynu joogno oo ay badan yihiin iyo 7 qodob ee kale marka la isugeeyo waa 21 qodob, markaa waxaan soo jeedinayaa:-

- In Ajandahan oo aad u badan darteed, dib loo eego oo waxaynu qaban karno lagu soo koobo, arrrimaha muhiimka ahna la soo horaysiiyo sida Xeerka Saaxaafada.

**Md. Maxamuud Xayir Ducaale:-** Shir-gudoonka, Xildhibaanbada, Shaqaalaha iyo Saxaafada ASC, Salaan ka bacdi, aniga dooddaydu ma badna, Xildhibaanadii hore waxaan ku taageersanahay in Xeerarka siday u kala muhiimsan yihiin oo u kala diyaarsan yihiin loo ansixiyo, anigu waxaan soo jeedinayaa in Ajandaha lagu soo daro:-

- **Xeerka Shaqaalaha Golaha,** madaama Shaqaaluhu Goluhu aanay xeer lahayn, xeerkaasna waa diyaar, waxaan ka codsanayaa in Xildhibaanadu igu taageeraan in xeerkaas shaqaalaha lagu soo daro.
- **Xeerka Ciqaabta Guud iyo Xeerka Jidaynta 2% Gobolada Barri** ha la siiyo Iyana muhiimada kowaad.

**Md. Maxamed Khadar Daahir: -** Shir-gudoonka, Xildhibaanbada, Shaqaalaha, Saxaafada iyo Shacabka reer Somaliland ASC, Salaan ka bacdi, waan ku taageersahay in mudnaanta la kala siiyo qodobada ajandaha ku jira, laakiin waxaan soo jeedinayaa Ajandaha qodobada ku jira in aan wax laga saarine dhamaantood loo daayo. Hadii aynu dedaalno waxaan aaminsanahay inaynu xeerar badan sii dayn karno. Markaa waxaan soo jeedinayaa:-

- **Xeerarka** wixii Golewaynaha horyaal aynu soo horaysiino, wixii Gudiyadu hayaana aynu gadaal marsano.
- **Abaarta** jirta aynu qodob gaar ah ka dhigno oo aynu si gaar ah uga hadalno.
- **Xeerarka** qaar bay Xukuumadu degdeg ugu baahan tahay si ay waajibaadkeeda u gudato sida Xeerka Nidaamka Xukuumada, **Xeerka Nidaamka Xukuumada aynu ka dhigno xeerka kowaad**, inta Kalena siday u kala muhiimsan yihiin baynu u kala galaynaa.

**Marwo. Aamina Cilmi Fariid:- -** Shir-gudoonka, Xildhibaanbada, Shaqaalaha iyo Saxaafada waan salaamaya, anigu waxaan soo jeedinayaa:-

- In mudanaanta kowaad la siiyo **Xaalada Abaaraha iyo Amniga**
- **Xeerarkan** in la kala siiyo mudnaan oo siday u kala muhiimsan yihiin oo time frame iyo deadline xeerkasta loo sameeyo.

**Md. C/rashiid C/laahi Muuse: -** Waxaan soo jeedinayaa:-

- **Abaarta** jirta aynu qodob gaar ah ka dhigno oo aynu si gaar ah uga hadalno.
- In Warbixinada sida Shir-gudoonka iyo Gudiyada lagu daro **Warbixinta Xildhibaanada**
- In Xeerarka Golewaynaha horyaala loogu soo horaysiiyo iyo **Xeerka Saxaafada**
- **In la xisaabtanka Xukuumada** oo ka mid ah waajibadaka iyo shaqada lagu soo daro Ajandaha oo loogu soo horaysiiyo Amniga oo hay'addaha amniga wax laga waydiiyo xaalada amniga.

**Md. Abuubakar Siciid Cali: -** Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal, madaama aanu jirin xildhibaaan soo jeediyay in ajandaha laga saaro hal qodobna, taas micneheedu waxa weeye in sidiisa lagu qaatay, sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa:-

- In Ajandahan mudnaanta la kala siiyo oo siday u kala muhiimsan yihiin loo soo kala horaysiiyo.
- In loogu soo horaysiiyo arrinta **abaarta iyo arrinta Amniga.**

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa Xeerarkan soo noqnoqnaya **in wakhtiga lagu saleeyo iyo wixii la qaban karo marka ajandaha la samaynayo, inaguna aynu dedaal la nimaadno oo ay ina go'naato sidii aynu u dhamayn lahayn shaqadeena**, sidoo kale in la iswaydiiyo oo la darso sababta xeerarka ansixiwaayay ay u soo noqnoqnayaan.

**Md. Bile Cabdi Ducaale: -** Anigu waxaan odhan lahaa:-

- Xeerarkan faraha badan ee 14 ka ah 7 Xeer ha lagu koobo, sababtoo ah iyadda oo aynaan dhamaynin ayuu kal-fadhi kastaa uu xidhmaa, Xeerka Ciqaabta Guud ha lagu soo daro, **Xeerka saxaafada ha laga saaro oo fadhiga kan xiga ha lagu soo daro ayaan soo jeedin lahaa, xeerarka qaar aynu dib u dhigano, Xeerka Rahanka, Xeerka Amniga iyo Tiknolojiyda, Xeerka Dakhliga shidaalka, Xeerka waxkabadalka hay`adaha iyo masiibooyinka, Xeerka Xafiiska imtixaanaadka guud, Xeerka wax kabadalka jinsiyada, Xeerka Booliska** aynu dib udhigano.

**Md. Maxamed Jaamac Ismaaciil (koodbuur): - Anigu waxaan soo jeedinayaa sixitaan uun,** maalinka aynu u codaynaynay waxaan u malaynayaa inuu ku jiray **Xeerka Ciqaabta Guud** iminkana kuma jiro, in latixgaliyo wixii ay Business committee u codeeyen intaas ayaan ku dari lahaa.

**Md. Maxamed Xasan Siciid:-** Mudane Gudoomiye iyo mudanayaaal Xeerarkan waxay u soo kala horeeyaan sida ay u kala hawl yar yihiin iyo sida ay u kala muhiimsan yihiin xeerarka ugu badan ee halkan ku qoran ee ugu soo horeeyaa waa xeerarka Golaha marka horeba horyaalay, kuwa danbana waa kuwa gadaal laga keeni doono.

Mudane Gudoomiye,

- Golahan sida uu dhigayo Xeer hoosaadku, marka dood lagalo waa in doodaa hadalqoraalkeedkii la keenaa oo qodobada secondment-ga helay iyo kuwa labada secondedka helay iyo kuwa sedexda xildhibaan taageereen lasoo kala hufaa, oo Golle waynaha la horkeenaa oo markaa cod lagaliyaa.
- Waxa kale oo aan soo jeedinayaa waxa weeye, Gollahani inuu shaqeeyo hadii loo baahan yahay saacadaha shaqada wax halaga badalo, halkan waxaa inoo yaal dhawr iyo toban xeer oo ku soo noq- noqonayay ajandaha Golaha, muddo dheer golahani waxa uu ubaahan yahay waqtiga shaqada in wax laga badalo, oo xildhibaanada iyo shirgudoonku ay xisaabtan galaan.
- Waxaan soo jeedinayaa, mudanayaashu waxay bilaabeen dooddii xaalada guud iyada oo ajandihii laga hadlayo, qodobada xaalada guud gali doona in manta laga sii doodaa oo layidhaah qodobkaa halagu daro, maahee xildhibaan walbaa maalinta doodiisa uu usoo diyaar garoobayo, Qodobada uu dooda uu la shir imanayo maalintaa haka hadlo.

Waxaan soo jeedinayaa sida uu xeer hoosaadku uu dhigayo qodobadii ay xildhibaanadu ka hadleen, ee meeshaa doodii ka dhacdey soo gunaanada, dabadeedna hala codeeyo.

**Md. Jamaal Cali Aadan (Jaah): -** Waad ogtihiin maanta waxaa dalka ka jirta **Abaar** aad iyo aad u daran, Madaxwaynuhu aad iyo aad buu u mahadsan yahay oo waxa uu saaray Guddi abaareed saaray waxaa ladoonayaa sidaas oo kale dareenkaa uu dadkiisa iyo dalkiisa uu u muujiyay, Golahanina inuu u muujiyo ayaa ladoonayaa. **waxaaa ladoonayaa in ay halka u saraysa ay ka gasho Xaalada Abaartu,** waxaa la doonayaa in mudanayaashu ay **Barri iyo Galbeed ay u kala baxaan,** waxaa la doonayaa in ay koonfur iyo waqooyi ay u kala baxaan.

**Md. Fu`aad Axmed Diiriye:-** Mashruucyada sharci ee qornaa way farabadnaayeen ee anigu waxaan qabaa:-

- In laga dhigo kala badh 14 laga dhigo 7 Xeer, todobadaas xeerna lagu soo daro **Xeerka Ciqaabta guud**, marka aynu 8 Mashruuc sharcina lagu soo koobo xeerarka ajandahan ku jiraya.

- Xaalada Guud madaama oo ay balaadhan tahay in hawlaha taagan oo **Abaartu** kow ka tahay gooni looga saaro.

**Md. Cabdikariin Aadan Cali Dubad: -** Gudoomiye, guud ahaan waa todoba qodob, shanta qodob ee u horeeeya sidooda ayaan u ansixinayaa, waxa kaliya oo aan wax ka badali lahaa warbixinta Gudiyada in lagu soo koobo warbixinta Gudidda Joogtada madama Gudiyadu badan yihiin.

Xeerarka, waxay u kala qaybsamaan 7 xeer oo hore iyo 7 xeer ee dambe, marka waxaan soo jeedinayaa in 7 xeer ee hore sidooda loo qaato. 7 soo hadhay dib baan u dhigi lahaa.

Waxaan soo jeedinayaa xaaladaha dalka gaar ahaan amniga iyo waxybaaha amni dara keena inaynu dood fiican ka yeelanayo. Sidoo kale inaynu na ka hadalno fakhriga iyo dhaqaalaha, waxa kale oo aan soo jeedinayaa i nidaamka doorashooyinka lagu soo daro oo aynu ka dooddno. Inaynu ka hadalno nidaamka shaqo qorista

**Md. Mubaarak Xuseen Maxamed (Xeeldheere):** - Waxaan soo jeedin lahaa:-

- **In xisaab xidhka laga saaro ajandaha maadaama uu yahay 2023 muhiimna aanu inoogu muuqan**
- In **Xeerka saxaafada** kan kowaad laga dhigo
- **In Xeerka xafiiska imtixaanaadka** xaga hore
- **In Xeerka ciqaabta** guud lagu soo daro,
- **In Xeerka Booliska** oo xaga danbe ku jira in xaga hore la soo mariyo.
- In Xeerarka Maaliyada oo mudo golaha dhex rafanayay in la soo hor mariyo.

**Md. Mubaarig Muuse Ismaaciil:-** Marka hore waxaan Golaha ku raacsanahay in laga hadlo xaalada abaaraha, hase yeeshe Gobolka Sanaag xaalad abaareed baa ka jirta ilaa Xeebaha, marka waxaan soo jeedin lahaa in sida waftigii Gudoomiye ku-xigeenka 2aad Gobolada Galbeedka u tagay in wafti ka soo warbixiya xaalada abaareed ee Gobolka Sanaagna la diro.

Xeerarka, Mudane Gudoomiye waxaan soo jeedinayaa madaama xeerar muhiima xukuumadu inoo soo gudbisay in kuwaas loogu horeysiiyo, **laakiin in Xeerka saxaafadu** uu xeer deg-deg ah yahay kuma raacsani xildhibaanada soo jeediyay, waxa ka muhiimsan **Xeerka Cashuuraha, Xeerka Kala-Xadaynta iyo Xeerka Tamarta laga soo shaqeeyo oo la ansixiyo.**

**Md. Faysal Yuusuf Jaamac:-** waxaan soo jeedinayaa:-

- **In laga saaro ajandaha** Xeerka Rahanka, Xeerka, Amniga iyo Tiknoolajiyda, Xeerka dakhliga shidaalka, Xeerka wax kabadalka hay`ada aafooyinka, Xeerka xafiiska

imtixaanaadka, Xeerka wax kabadalka jinsiyadaha iyo Xeerka wax kabadalka Booliska.

- Inta kale aynu ku soo koobno Ajandeheena.

**Md. Maxamuud Saalax Cabdi:-** Marka hore Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Shaqaalaha iyo Saxaafadaba waan salaamaya, waxaan doonayaa inaan dhawr arrimood aan seconmentgareeyo, kal-fadhigeenu wuxuu ku salaysan Yahaya 8 todobaad marka lagu dhufto 4 cisho ee aynu wiigii shaqayno waa 32 casho, marka 32kaas casho marka laga reebo 6 casho oo doodda xaalada guud iyo warbixnada qaadanaysa, waxa soo hadhaya 26 cisho iyo 14 xeer, taas macneheedu waa in xeer walba haysto wax laba maalmood ka yar (1.8 days).

Waxaan odhan lahaa anigu

- **In Xaalada Guud** lagu soo koobo ***Abaaraha, Amaanka iyo Siyaasada*** oo aynu saddexdaas qodob xaalada guud aynu awoodda saarno.
- **In aynu Xeerarka ku soo koobno 7 xeer oo Golewaynaha yaala iyo laba xeer oo kala ah, Xeerka Ciqaabta Guud,** iyo xeerka saxaafada.

**Md. Xasan Saleebaan Dhuxul (Laabsaalax): -** Xildhibaan kasta oo hadlay hadalkiisa iyo aragtidiisa waan soo dhowaynayaa, wakhtiga oo inagu socda darteed, waxaan soo jeedinayaa:-

- **In Xaalada guud** lagu soo koobo ***Abaaraha, Amaanka iyo Siyaasada***
- **Xeerka Shaqaalaha Golaha** oo Xildhibaan Maxamuud Xayir ka hadlay waa lagama maarmaan in dib loo eego.
- **Xeerka Saxaafada** oo Xildhibaan Raambo ka hadlay inaynu mudnaanta siina isna waa muhiim

**Md. Siciid Jaamac Xasan: -** Mudane Gudoomiye waxaan soo jeedin lahaa:-

- **In Xaalada Guud** aynu laba qodob u kala qaadno kuwaas oo kala ah ***Abaaraha iyo Dhaqaalaha***
- In **Xeerka Saxaafada** kan kowaad laga dhigo.
- In **Xeerka wax ka bedelka Xeerka nidaamka xukuumada** xaga dambe la geeyo
- In **Xeerka Dakhliga iyo wax ka badelka Xeerka Jinsiyda.**
- **In Time-frame loo sameeyo Xeerarka aynu ka shaqaynayno**

- **In marka aynu ka hadlayno Xaalada abaarta iyo amniga Xildhibaanada** constituency-goodii loo kala diro si ay soo xaqiiyaan madaama abaar ba'ani jirto.

**Md. Xirsi Cabdilaahi Xirsi: -** Gudoomiye, Waxaan soo jeedin lahaa:-

- In aynu ku darno qodob muhiim ah oo odhanaya **dib u eegista xeerarka dhaqan galka ah,**
- **In laga saaro** xeerkan aadka usoo noq- noqdey ee ***kabka Gobolada barri iyo nidaamka cashuuraha dawladaha Hoose ee ay u qabato dawlada dhexe.***
- **In xisaab xidhka 2023** la soo hor mariyo.
- **In Wada-hadalada Soomaaliya iyo Somaliland** in isagana lagu daro sida Xildhibaan C/laahi Muuse soo jeediyay.

**Md. Saleebaan Maxamed Faarax (Goox): -** ASC, anigu waxaan muhiim u arkaa 4 qodob marka Warbixinada laga yimaado, kuwaas oo ah:-

- In Xaalada guud ku soo qaadano
  - ✓ Abaaraha
  - ✓ Dhaqaalaha
  - ✓ Amniga
  - ✓ Siyaasada iyo Arrimaha inagu hareeraysan
- In Xeerarka lagu soo daro
  - ✓ Wax ka badelka Xeerka Kala-xadaynta Nidaamka Xukuumada
  - ✓ Wax ka badelka Xeerka Tamarta

| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
|---|---|
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ---------------------------------------------------- | ---------------------------------------- |